

Dawladdu sharciyo adag bey soo dejisay

**Cudurkii wuu ku sii fidayaa
Yurub.dawlada Iswiidhan oo
sharciyadii sii ad ad kaysay .**

Cudurkii aad buu ugu fidayaa Yurub, xataa Iswiidhan. Si dadka ka shaqeeya goobaha caafimaadka, ay u daaweeyaan dadka aadka u liita, waa inaan anagana ku dadaalna inaan cudurka fidin.

”Xaaladda aad bay uga sii dareysaa. Fidida cudurkuna waa ay sareysaa oo [...] shaqaalaha goobaha caafimaadka iyo kuwa xanaanada dadka da’da ah waxay shaqeeyaan habeen iyo maalin” sidaa waxaa horey u yiri ra’iisal wasaare Stefan Löfven.

- waa inaan dukaamada laysku ciriirin. Dadka leh dukaamada iyo goobaha waaweyn ee ganacsiga waa iney hubiyaan inta qof ee soo geli karta mar keliya si nabad gelyo ah. Oo markaa kadib ay fuliyaan in intaas ka badan aaney soo gelin dukaankanada mar qura.

- Maalmaha u dhexeeya ciidda kirismaska iyo sanadka cusub, dukaamadu waxay soo jebiyaan alaabada ay gadaayaan. Sanadkaan waxaa dukaamada lagu dhiira gelinayaa inaaney sameynin wax qiimo dhimida maalmaha dhexdooda.

Dugsiyada sare waxay ardaydu waxbarashadooda ku qaadan doonaan guryahooda ilaa 24-ka januari.

- sharcigii 8-da wuxuu noqday 4 –hadda. Afar ruux keliya baa loo ogolyahay iney wada fadhiistaan maqaayadaha. Wax khamri ah lama iibin karo wixii ka danbeeya 8-da fiidnimo (sharcigu wuxuu billanayaa 24-ka disembar)

Wixii guriga kasoo qaban kara shaqadooda waa iney saa yeelaan.

Waa inaad afka xirataa hadaad bas ama tareen ku safrayso. Tani waxay bilaabanaysaa 7-da janaayo waana maalmaha shaqada. Hadaadan af xir haysan waxaa lagaa siinayaa baska ama tareenka. Sharcigani waa isku mid magaalada iyo baadiyaha.

**Af xir markuu jiro ciriiri gaadiidka
dadweynaha.**

Baaritaanadii la sameeyey waxba kama ay sheegin in af xirku fiican yahay iyo inkale. Wadamo badan oo laga xirto af xirka ayuu cudurku weli ku fidayaa.

”Tan ugu muhiimsan uguna nabadgelyada badan oo lagu joojin karo fidida cudurkan waa kala fogaanshaha. Meelaha aysan suurta galka ka ahayn taas, af xirku wuu wanaagsan yahay”, sidaana waxaa yiri Johan Carlsson oo ah madaxa hay’adda caafimaadka.

7-da bisha janaayo arday badan baa iskuuladii ku noqonaya, dad badana waxay dib u bilaabaya shaqadooda. Markaa basaska iyo tareenada qaar ciriiri bay noqon doonaan.

**Weydii iskuulka ama kammuunka
hadii aadan hubin**

Kamuunadoo idil waa ay xireen maktabadihii buugaagta, madxafyadii, goobihii cayaaraha iyo xanaada caruurta ee furan.

Kamuunada qaarkood meelo kaloo intaa dheer bayba xireen.

Weydii iskuulka ama kammuunka hadii aadan hubin marwalba

Salaan diiran iyo nabadgelyo

Waxaan ku jirnaa waqti wel wel badan. Sidaa ay tahay anaga kashaqayna arrimaha deg dega ah ee gobolka Kalmar waxaan u diraynaa salaan ku socota intiina qaybisa ama akhrisata , majaladan la yiraa *Maxaa ka cusub karoona*.

Inkastoo aanu xaalku fiicnayn, hadana waxaan rajeynaynaa inaad ciidaan sanadka cusub.

Isku daya inaad in badan dibadda uga baxdaan guriga idinkoo ilaalinaya kala fogaanshana!

Waanu dadaalaynaa anagoo wada jirna!



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.
Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay’adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay’adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka , hay’adda caafimaadka ee gobolka iyo mas’uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhex dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



facebook.com/krissamverkan.kalmar

Kalmar kommun

